



Kala doorashadaal dugsiya fasal sannadeedka 7 aad ka hor

Caadiyan, dugsiyadu waxa ay soo dhaweyyaan labadoodaba, ardayda ku jira fasalka 6 aad iyo qofka masuulka ka ah ilmaha shirarka macluumaadka, ka hor fasalka 7 aad. Inta lagu jiro aafada hadda jirta, dugsiyadu ma heli karaan fursad ay ku casuumaan qofka masuulka ah ilmaha shirarka macluumaadka, waxaana la raacayaa talooyinka hay'adda ka hortagga cudurada faafa ee Dalarna. Dugsiyadu waxa ay taas baddalkeed bixin doonaan macluumaad cad oo ku yaalla falun. eeg, waxyaabo kale, macluumaadka xiriirka maamulayaasha iyo maamule ku xigeenada, halkaas oo lagugu soo dhaweynayo in aad idinku ula jeedsataan idinka su'aalaha. Buug yar oo macluumaad ku saabsan dugsiyada ayaa lagu soo lifaaqayaa baahinta.

Ku meeleynta dugsiya fasal sannadeedka 7 aad

Adiga oo hadda ku jira meelaynta dugsiya ee Britsarv, Dugsiya Hälsinggårds, Dugsiya Montessori ama Dugsiya Svärdsjö waxa lagu ballan qaadayaa in aad boos ka heli karto fasal sannadeedka 7 aad ee dugsiya aad hadda adigu ku jirto oo uma baahnid in aad soo gudbisno codsi.

Ardayda kale waxa loogu meeleyaa dugsiya sida ku cad shaxda hoose oo ku salaysan annaga nidaamkayaga joogtada ah iyo sida ay u kala horreeyaan mudnaanta meelaynta dugsiya iyada oo aan wax codsi ah la soo gudbin.

Arjiga

Haddii aad adigu rabto meelayn dugsi oo ka duwan sida ku cad shaxda hoose, waa in aad adigu buuxisaa arji. Tani waxa ay sidaa oo kale khusaysaa adiga oo ku jira meelayn dugsi dugsiyada madaxa bannaan ah ama meelayn dugsi ku leh degmo aan Falun ahayn oo raba in aad boos ka hesho dugsiya degmada fasalka sannad 7 aadka. Waxa aad gelayaa gacan koowaad, gacan labaad iyo doorashada gacan saddexaad ee codsiya. Foomka waxaa

laga heli karaa: falun.se Waxbarashada iyo daryeelka carruurta - Dugsiya hoose - Doorashada dugsiya degmada ka hor fasalka sannadeedka 7 aad.

Codsiga waa in uu soo gaadhaa degmada Falu, carruurta iyo maamulka waxbarashada ugu dambayn 1 da Febraayo. Soo gudbi codsigaga wakhti fiican si uu noogu soo gaaro wakhtiga loo qabtay. Annagu ma qaadaneyno mas'uuliyadda haddii adeegga boostada uu qaato waqti ka badan intii la filayay.

Nidaaminta iyo kala horraysiinta joogtada ah ee habaynta meelaynta dugsiya marka awoodda ugu badan la gaadho:

1. Ardayda urur ahaan ka tirsan dugsiya sare iyada oo loo eegayo meesha ay hadda dhigtaan (eeg shaxda hoose)
 2. Ardayda ka diiwaan gashan gudaha degmada Falu
 3. Ardayda kale
- Haddii ay jiraan shuruudo siman oo u dhexeeya ardayda, qori tuurka ayaa go'aamin doona.

Xaqiijinta ah in uu arjigu na soo gaadhay

Adigu xajiitina booskaaga waxa aad ku heli doontaa dhanka email ahaan in codsiyaga la helay, waase haddii aad geliso ciwaanka iimaylka codsigaga.

Ogeysiiska ku saabsan meeleynta dugsiya

Adiga ugu dambayn 1-da Maarso, waxa lagugu wargelinayaa meelaynta dugsiya warqad ku socota ciwaanka diiwaangelinta dadweynaha ee ilmaha.

Gustaf Malmberg

Madaxa hawlgalinta dugsiyada hoose iyo kuwa gaarka ah

Qaybinta nidaamka

Dugsiga hadda lagu meeleeeyay (Fasal sannadeedka 6)	Fasal sannadeedka 7–9
Dugsiga Bjursås F6, Dugsiga Grycksbo, Dugsiga Sågmyra	Dugsiga Bjursås 7–9
SDugsiga lätta, Dugsiga Östra	Dugsiga Britsarvs
Dugsiga Hosjö, Dugsiga Hälsingberg, Dugsiga Vikaskolan	Dugsiga Hälsinggårds
Dugsiga Liljans, Dugsiga Linghed, Dugsiga Rönndals, Dugsiga Sundborn, Dugsiga Toftaskolan	Dugsiga Svärdsjös
Dugsiga Aspeboda, Dugsiga Främbys, Dugsiga Gruvris, Dugsiga Södra	Dugsiga Västra

Degmada Falu
Maamulka carruurta iyo wax barshada
023-830 00

